Magaca Bukaanka: ________________________________________

**Caddeynta Qaan-gaarka Dhalinyarada (loogu talagalay bukaannada ka yar 18 jir ee la tallaalayo)**

Foomkan wuxuu shaqaynayaa muddo hal sano ah laga bilaabo taariikhda la saxiixay.

Anigoo u saxiixaya waalid ahaan ama mas'uul sharci ah (ama bukaan haddii laga gaaray shardi sharci ah oo ka reeban), waxaan si ikhtiyaari ah u bixinayaa oggolaansho si loo helo adeegyo caafimaad, oo ay ku jiraan tallaallada qasabka ah, ee ay bixiyaan shaqaalaha Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Metro. Anigoo og in ciqaab ka dhalan karto been-abuur ama marin-habaabin, waxaan caddaynayaa inaan ahay waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee ilmaha hoos ku qoran, isla markaana aan leeyahay awood waalidnimo oo aan ku bixiyo oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan tallaallada. Warqadaha mas'uuliyadda waa in la keenaa xilliga ballanta, waxaana nuqul ka mid ah lagu hayn doonaa faylka bukaanka. Fadlan dib u eeg oo hoos saxiix:

Waxaan awood u leeyahay inaan go'aanno caafimaad ka gaaro bukaanka/ilmahayga maanta lagu arkayo rugta caafimaadka.

Waxaan fahamsanahay taxanaha tallaallada looga baahan yahay in bukaanka/ilmahayga uu u buuxiyo si uu dugsiga u galo (oo ku taxan dhabarka dambe ee foomkan), WAXAANA jeclahay in bukaanka/ilmahayga la siiyo taxanahaas tallaallada ah iyadoo lagu saleynayo baahida, da'da, iyo u-qalanka maanta.**.

Waxaan dib u eegay warqadaha macluumaadka tallaalka (VIS) ee ku yaalla mareegta CDC (https://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/current-vis.html)ama la i siiyay nuqul ka mid ah warqadaha macluumaadka Tallaalka (VIS) ee tallaallada maanta la bixiyay/la qaatay.

Waxaan oggolahay in foomkan uu ahaanayo oggolaansho shaqeynaya muddo hal sano ah laga bilaabo taariikhda la saxiixay, si loo sii wado bixinta tallaallada lagama maarmaanka ah ee taxanaha ah, ilaa uu waalidka ama mas'uulka sharcigu kansalo oggolaanshahan.

Ma hayo wax su'aalo dheeraad ah ka hor inta aan tallaallada maanta la ii siin.

________________________________________ __________________________

Magaca ku qoran ee Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah Xidhiidhka uu la leeyahay Bukaan-socodka

________________________________________ __________________________

Saxiixa Bukaanka/Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah Taariikhda

____________________________________________

Shaqaalaha Waaxda Caafimaadka (Saxiixa/Darajada)

*Sida ku cad TCA § 63-1-165, "'Qof aan qaan-gaarin' waxaa loola jeedaa qof aan gaarin da'da siddeed iyo toban (18) sano jir; umana jiro qof: i) xorriyad sharci ah la siiyay si waafaqsan Title 29, Chapter 31 (Cinwaanka 29, Farqada 31); ii) u baahan daaweyn degdeg ah si waafaqsan § 63-6-111; iii) hadda katirsan ama horey uga mid ahaan jiray xubin ka tirsan ciidamada qalabka sida ee Maraykanka, ama xubin ka tirsan unugyada kaydka ama ilaalada qaranka; ama iv) ah waalidka ilmo yar oo haysta mas'uuliyadda buuxda ee ilmahaas yar.

**Eeg dhabarka dambe ee foomkan si aad u aragto shuruudaha tallaallada ee carruurta dhigata dugsiyada gobolka Tennessee.

**Shuruudaha tallaallada ee carruurta dhigata dugsiyada gobolka Tennessee**

**Carruurta iska diiwaangelinaysa dugsiga xannaanada**

- Talalka Cagaarshowga B (HBV)
- Tallaalka Cudurka Cunaha ku Dhaca (DTaP, ama DT haddii ay ku habboon tahay)
- Talaalka dabaysha (IPV ama OPV) – kuurrada ugu dambeysa waa in la siiyaa marka ilmuhu gaaro ama dhaafo 4 sano jir.
- Talalka Jadeecada, Qaamo-qashiirka, iyo Rubella- 2 kuurro midkiiba, badanaa waxaa loo wada siiyaa si isku mar ah (MMR).
- Talalka Busbuska – 2 kuurro ama taariikh la hubo oo muujinaysa in uu hore u qabo cudurka.
- Talalka Cagaarshowga A) A- guud ahaan 2 qiyaas, oo ugu yaraan 6 ilaa 18 bilood u dhexeeyaan.

**Carruurta oo dhan ee galaysa fasalka 7-aad (oo ay ku jiraan kuwa horey u diiwaangashnaa).**

- Tallaalka xoojiya ee Tetanus-Diphtheria-Pertussis (Tdap) – waxaa loo baahan yahay caddeyn muujinaysa hal qiyaas oo Tdap ah in la siiyay ka hor gelitaanka fasalka 7-aad (oo la maamulo marka uu ilmuhu yahay 10 jir ama ka weyn), iyadoo aan loo eegin taariikhda tallaalkii Td-dii ee hore.
- Cusboonaysiin ku saabsan shuruudaha tallaalka Busbuska (Varicella) ee fasalka 7-aad

**Carruurta cusub ee isdiiwaangelinaysa dugsiyada Tennessee ee dhigaya fasallo aan ahayn fasalka dugsiga xannaanada carruurta**

- Tallaalka Cudurka Cunaha ku Dhaca (DTaP, ama DT haddii ay ku habboon tahay)
- Talalka Jadeecada, Qaamo-qashiirka, iyo Rubella- 2 kuurro midkiiba, badanaa waxaa loo wada siiyaa si isku mar ah (MMR).
- Talaalka dabaysha (IPV ama OPV) – kuurrada ugu dambeysa waa in la siiyaa marka ilmuhu jiro ama dhaafo 4 sano jir; shuruuddani hadda waa qasab.
- Talaalka busbuska (2 kuuro ama taariikh la hubo oo muujinaysa in uu hore u qabo cudurka) – hore waxaa looga baahnaa oo keliya hal kuuro.
- Tallaalka Cagaarshowga B (HBV) – hore wuxuu kaliya uga baahnaa fasalka dugsiga xannaanada carruurta iyo gelitaanka fasalka 7-aad.
- Ardayda cusub ee galaysa fasallo aan ahayn fasalka 7-aad looma baahna inay qaataan tallaalka Tdap

**Ardayda jaamacadda ee waqtiga-buuxa dhigata ee gobolka Tennessee**

- Talalka Jadeecada, Qaamo-qashiirka, iyo Rubella- 2 kuurro midkiiba, badanaa waxaa loo wada siiyaa si isku mar ah (MMR):haddii uu ku dhashay ama ka dib 1-da Janaayo 1957 oo keliya.
- Tallaalka Busbuska (2 kuuro ama taariikh la hubo oo muujinaysa in uu hore u qabo cudurka): haddii uu ku dhashay ama ka dib 1-da Janaayo 1980 oo keliya.
- Tallaalka Cagaarshowga B (HBV) – oo keliya ardayda cilmiga caafimaadka ee laga filayo inay la macaamilaan bukaan, waxaana la bixiyaa (ka hor inta uusan bilaaban xiriirka bukaanka).

- Talaalka Meningococcal -ugu yaraan hal kuuro oo la siiyo marka uu ardaygu gaaro 16 sano jir ama ka weyn, haddii uu markii ugu horreysay isdiiwaangelinayo hay’ad waxbarasho oo dawladeed, isla markaana uu ka yar yahay 22 sano jir oo uu degayo hoyga ardayda ee gudaha jaamacadda; hay’adaha waxbarashada gaarka loo leeyahayna iyagaa dejista shuruudahooda tallaalkan.